Tusmada Fududaynta

Maxaa ka Jira Xaafadayda?

Aalada Khariiradaynta Cadaalada Bii'ada ee CEED

Tusmadaan hagista ah waxaa loo adeegsan karaa in xog looga bixiyo lagula suureeyo xidhiidhada u dhexeeya bii'ooyinkeena tooska ah [kuwaasoo aan ku nool nahay, ka shaqayno, ku ciyaarno, wax ka barano, aana ku cibaadaysano] iyo xariirada kala dhexeeya dhaqdhaqaaqyada cadaalada bulshada. Waxaan filaynaa kadib marka la adeegsado Aalada Khariirad samaynta Cadaalada Bii'ada iyo aqoonsiga saamaynada gaarka ah ee EJ ku leedahay bulshooyinkaaga iyo xaafadahaaga, inaad awood dheeraad ah u heli doonto sii wadista waxbarashadaan iyo kor u qaadista wacyiga bulshadaada iyo ururadaada.

Agabka loo Baahan yahay

- Aalada Khariirada ee EJ ga CEED
- Borojaktar ama aalado gaar ah (tusaale laabtoobyada, iPad-yada)
- Khariirada wayn ee Twin Cities
- Taariikhda Labo Xaafadood oo Ku yaala Minneapolis
- Qoraal sharaxaad ah
- Qalin koobiyo
- Koolo bac

Tallaabooyinka Fududaynta

A. Horudhac: Yaan nahay? Yaa halkan wada jooga (magaca/xaafada)? Yoolalka maanta [10 daqiiqo]

B. Waa maxay Qalabka Khariirad samaynta? [10 daqiiqo]

1. La wadaag isticmaalka qalabka khariirad samaynta, waxa uu na tusaayo, sababta arkida culaysyada iyo saamaynada bii'ada ee ka jira xaafadaha iyo deegaannada ay muhiim ugu tahay dagaalka loogu jiro cadaalada bii'ada.
2. Bixi sharaxaad guud oo ku Aalada Khariirad samaynta ee CEED ee ka muuqata shaashada. Samee qiimayn guud oo ku aadan sida lagu geli karo aalada, sida loo adeegsado, iyo ugu danbayntii, waxa ay noo sheegi karto iyo sababta arkida xogtaan ay muhiim u tahay -- aqoonso tusaaleyaasha muuqda ee cadaalada darada bii'ada ee aan loo sinayn ee ka jirta deegaanno iyo xaafado gaar ah.

C. *Gaar u ah MN[1]* Xagee ayaan ku nool nahay sidee ayaanse iskugu xiran nahay? [10 daqiiqo]

1. Ku dhaji Khariirada Twin Cities.
2. U sheeg ka qaybgaleyaasha inay istaagaan/isku imaadaan (ayagoo uu u dhexeeyo badka kulaylaha).
3. Tixraac Khariirada ku dhagan darbiga. Sii qoraallada sharaxaada ah iyo qalin koobiyada ka qaybgale kasta. U sheeg inay ku qoraan magacyadooda iyo xaafadooda qoraalka sharaxaada ah.
4. Ka codso ka qaybgaleyaasha inay wajahaan Khariiradaha ayna saaraan qoraallada sharaxaada ah xaafadahooda/aaga magaallada. Marka ay saaraan dhammaan qoraallada sharaxaada ah, sii 2-3 daqiiqo si ay u raadiyaan Khariiradaha iyo istiikarada. U sheeg inay sheegaan cida ay noqon karaan qaar kamid ah dariskoodu, inay naftooda dadka isbaraan, iwm.

D. Sidee ayay xaafadaydu u saamaynaysaa cadaalad darada bii'ada? [10 daqiiqo]

1. Adeegso su'aalo tusmayn ah si aad ugu booriso ka qaybgaleyaasha inay si qoto dheer uga fakaraan meesha y ku nool yihiin, ka shaqeeyaan, ku ciyaaraan, wax ka bartaan, ayna ku tukadaan iyo sida goobahaan ay saamayn cadaalad daro ah ugasoo gaari karto cadaalad darada bii'ada; fursad u sii ka qaybgaleyaasha inay ka fiirsadaan goobaha carqaladu ka jirto iyo meelaha leh adkaysiga ee xaafadahooda.
    a. Qofkee halkaan jooga ayaa walaac ka qaba tayada hawada xaafadaada? Sidee usoo urtaa hawada xaafadaada?
    b. Sidee ayaad ku ogaanaysaa dhismeyaal kasta oo ganacsi oo kuu dhow?
    c. Ma jiraa jid wayn / marinka wadada u dhow xaafadaada?
    d. Ma jiraan wax beeraha nasiinada ah, harooyin ku yaala xaafadaada?
    e. Ma jiraan wax dugsiyo ama xarumo bulsho ah oo ku yaala xaafadaada?
2. U adeegso aalada khariirada si aad u aragto xogta dheeriga ah ee aan ka baran karno meesha aan ku nool nahay iyo sida anaga/bulshooyinkeena ay u saameeyeen (ama aysan u saamayn) culaysyada bii'ada.

[1] Shaqadaan ayaa lagu koobiyayn karaa Khariirada magaaladaada/xaafada.

E. Sidee ayaan u adeegsan karaa Aalada Khariirada ee EJ? [15 daqiiqo]

1. Waqti geli soo bandhista Aalada Khariirada ee EJ? Kasoo qaado qoraal sharaxaad ah Khariirada oo ogoow xaafada – tan waxaa loo adeegsan doonaa inay noqoto tusaalaheena koobaad. Tus/sharax tijaabo lagu sameeyo Aalada Khariirad ee EJ - dooro qaybaha soo socda: Xogta deegaanka, Khad cas marinta Taariikhiga ah, iyo Heerarka Maarta Sunta Dhiiga ee La dhimay. Sheeg sheekada lagasoo qaatay qaybaha ku qoran Aalada Khariirad ee EJ ee xaafada.
2. Adoo adeegsanaaya bokiska gelitaanka khariirada, dul istaag "halyeeyga": sharax xogta faahfaahsan ee qaybo kasta ay sheegeyaan.
3. Ku boori xubnaha kale inay ka qaybgalaan: sheeg walaaca bii'ada ee ka qaybgaleyaashu ay ka qabi karaan bulshooyinkooda/xaafadahooda (tusaale hawo qarmuun)I kuxir walaacyada qaybaha kaladuwan ee lagu sharxay Khariirada EJ (tusaale ahaan, Warhsadaha Korontada, Khatarta Kansarka Sunta, iwm.).
4. Kasoo qaado 1-2 qoraallada sharaxaada ah Khariirada, adoo sheegaaya xaafada iyo magaca qofka. U sheeg inay sheegaan walaac ay qabaan. Ku xir walaacooda qaybta qariirada. U sheeg ka qaybgaleyaasha inay ku daraan lakab kale iyo/ama qayb kamid ah lakabka. Soo bandhig xogta, adoo sheegaaya farqiyada saamaynada ee dhammaan qaybaha magaallada.

F. Dooda kooxda [5 daqiiqo]

1. Maxay qariiradaan noo sheegaysaa? Maxaan u jeednaa?
2. Anagoo xogtaan ka hayna xaafadeena iyo deegaannada ku xeeran, sidee ayaan dareemaynaa?
3. Si wadajir ah, aqoonsada sida xaaladaha bii'ada qaarkood ay u saameeyaan xaafadaha qaar in ka badan xaafadaha kale.

G. Bulshooyinkee ayaa qaata dhibaata cadaalad darada bii'ada ee magaaladeena? [30 Daqiiqo]

1. U dhiib Taariikhda Labo Xaafadood oo Ku yaala Minneapolis[2] iy/ama lasoo bax xogta sawirka ah ee ka muuqata projactarka.
2. U sheeg ka qaybgaleyaasha inay ku qoraan 1 ilaa 2 (tani waxay aqoonsanaysaa xaafadaha ay "ku noolaan doonaan" shaqadaan). Marka qof kasta uu qaato lambarkiisa, u sheeg dhammaan kooxda qaadatay "1" inay israacaan, halka kooxda "2" ay israacayaan.
3. Eeg laynka tusaaleyaasha iyo xogta ku qoran Taariikhda Labo Xaafadood. U sheeg koox kasta inay qeexdo qaybta "xaafadooda" ayagoo xulanaaya. Qeex eray bixinta oo muuji tusaaleyaasha marka loo baahdo si kor loogu qaado fahanka iyo saameynta. Waydii su'aalo sharaxaad ah markasta:
    a. Maxay tani la macno tahay?
    b. Maxaad u aaminsan tihiin in khibradaha aagagaan dariska ah ay kaladuwan yihiin?
4. U sheeg ka qaybgaleyaasha inay ku laabtaan fadhiyadoodii hore. Biloow dooda iyo tixraaca Taariikhda Labo Xaafadood iyo sida ay u muujinayso isir nacayb/dabaqadaynta

[2] Tusaalahaan ayaa loo adeegsan karaa gobal kasta: gaarna uma ahan keliya Minneapolis, MN. Sheekada lagu muujiyay jaantuskaan xogta ayaa lagu dabiqi karaa magaalooyinka waxaana loo adeegsan karaa tusaale guud oo ku aadan isir nacaybka bii'ada iyo kala sooca dadka ee meel kasta.

ku salaysan bii'ada.

a. Waa maxay isir nacaybka bii'adu?
b. Waa maxay daqabadaha nolosha ee bii'adu?
c. Sidee ayay labadaan "faquuq" iskula xariiraan? (tusaale bulshooyinka ay saameeyaan).
d. Maxaad u aaminsan tahay in hal xaafad uu saaran yahay culayska cadaalada darada bii'ada oo ka culus tan kale? Ma xaq baa?
e. Maxaa la samayn karaa?
f. Xaafadahee ku yaala Minneapolis[3] ayaa u aragnaa tusaaleyaasha Taariikhda Labo Xaafadood?; tixraac khariirada magaallada iyo qoraallada sharaxaada ee qof kasta-ma jiraa wax kamid ah xaafadaha ku qoran qariiradaan oo tusaael wanaagsan u ah Taariikhda Labo Xaafadood? Waa kuwee xaafadaha/magaalooyinka kale ee Maraykanka oo loo adeegsan karo tusaale guud sidaan oo kale?

H. Muujinada iyo Gabo-gabada [10 daqiiqo]

1. Khulaasada; maxay barteen ka qaybgaleyaashu? Maxay la wadaagi doonaan xubnaha bulshada? Maxaan wali laga jawaabin?
2. La wadaag ilaha agabka qariirad samaynta oo dheeri ah, tilmaan Tusmada Isticmaalaha ee Aalada Qariirada ee EJ.
3. Oga mahadnaq ka qaybgalayaasha waqtigooda iyo ka qaybgalkooda; waxaan filaynaa inay wax cusub barteen ayna hami u qabaan inay sii wadaan wada sheekaysiga lamid ah kan maanta.

[3] U badel magaaladaada.